Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

Oggolaansho
Consent

Ogeysiis ku socda Macaamiisha: Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) ayaa si wanaagsan kuu caawin karta haddii aan awoodno in aan la shaqeyno hay'adaha kale iyo xirfadlayaasha garanaya adiga iyo qoyskaaga. Marka aad foomkan saxiixdo, waxaad DSHS iyo hay'adaha iyo shakhsiyaadka hoos ku qoran fasax u siineysaa in ay isticmaalaan oo ayna wadaagaan macluumaadka sirta ah ee adiga kugu saabsan. DSHS kuuma diidi karto dheefo haddii aadan foomkan saxiixin haddii oggolaanshahaaga loo baahan yahay si loo go'aamiyo xaq u yeelashadaada mooyaane. Haddii aadan foomkan saxiixin, DSHS waxaa weli laga yaabaa in ay u wadaagto macluumaadka adiga kugu saabsan ilaa iyo inta uu sharcigu oggol yahay. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan sida DSHS ay u wadaagto macluumaadka sirta ah ee macmiilka ama xuquuqahaaga asturnaanta, fadlan la xiriir Hab-dhaqannada Asturnaanta Ogeysiiska ee DSHS ama weyddii qofka foomkan ku siinaya.

Aqoonsiga Macmiilka

MAGACA	TAARIIKHDA DHALLASHADA	LAMBARKA AQOONSIGA

CINWAANKA	MAGAALADA	GOBOLKA	FURAHA XAAFADA

LAMBARKA TELEEFOONKA (KUDAR FURAHA XAAFADA)	MACLUUMAAD KALE

Oggolaansho

Waxaan oggolahay in lagu isticmaalo macluumaadka sirta ah ee aniga igu saabsan DSHS gudaheeda si loo qorsheeyo, loo bixiyo, oo la isugu dubarido adeegyada, daaweynta, lacag-bixinnada, iyo dheefaha loogu talagalay anigga ama ujeeddooyinka kale ee uu sharcigu oggol yahay. Waxaan sidoo kale fasax u siinayaa DSHS iyo hay'adaha hoos ku xusan, bixiyeyaasha, iyo shakhsiyaadka in ay isticmaalaan macluumaadkeyga sirta ah iyo in ay isu dhaafsadaan ujeeddooyinkan. Macluumaadka waxaa loo wadaagi karaa hadal ahaan ama elektaroonig ahaan, boosto ahaan, ama gacan ku geyn.

Fadlan calaamadee dhammaan kuwa hoose ee ku jira oggolaanshahan marka lagu daro DSHS oo u sheeg magac iyo cinwaan ahaanba:

- ☐ Bixiyayaasha daryeelka caafimaadka: _____
- ☐ Bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda: _____
- ☐ Bixieyaasha adeegga xanuunka isticmaalka maandooriyaha: _____
- ☐ Bixiyeyaasha kale ee ay DSHS qandaraaska la gashey: _____
- ☐ Barnaamijyo guryayn: _____
- ☐ Dugsi degmooyin ama kulliyado: _____
- ☐ Waaxda Sixitaanka ama Dhaqan celinta: _____
- ☐ Waaxda Dammaanada Shaqaalaynta iyo iskaashatadeeda shaqaalaynta: _____
- ☐ Maamulka Dammaanada Bulshada ama wakaalad dowladeed oo kale: _____
- ☐ Fiiri liiska lasoo lifaaqay
- ☐ Kale:

Sababta shaacinta: ☐ Sii socoshada daryeelka ☐ Sharci ☐ Shakhsiyeed ☐ Kale:

Waxaan bixinayaa oggolaansho iyo fasixid lagu wadaago diiwaanada iyo macluumaadka soo socda (dooro dhammaan kuwa la adeegsan karo):

- ☐ Dhammaan diiwaannada macmiilkeyga
- ☐ Diiwaannada liiska ku lifaaqan
- ☐ Kaliya diiwaanada soo socda
  - ☐ Taariikhda qoyska, bulshada iyo shaqada
  - ☐ Daaweynta ama qorsheyaasha daryeelka
  - ☐ Diiwaannada lacag-bixinta
  - ☐ Qiimeynta shakhsiyeed
  - ☐ Iskuul, waxbarasho, iyo tababar
  - ☐ Macluumaadka daryeelka caafimaadka dhimirka (qeex):
  - ☐ Macluumaadka daryeelka caafimaadka (qeex):
  - ☐ Kuwo kale (qor):

FADLAN XUSUUSNOOW: Haddii diiwaanada macamiilkaaga ay ku jiraan mid ka mid ah macluumaadkan soo socda, sidoo kale waa in aad buuxisid qaybtan si ay ugu jiraan diiwaan-gelinadan.

Waxaan bixinayaa oggolaanshaheyga si loo sii deeyo diiwaanadan soo socda (calaamadee dhammaan kuwa la adeegsan karo):

☐ Caafimaadka dhimirka ☐ Natiijooyinka tijaabada HIV/AIDS iyo STD, oggaanshaha, ama daaweynta
☐ Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaha

- **Oggolaanshahan wuxuu ansax yahay muddo hal-sano ah ama ☐ ilaa _____ (taariikhda ama dhacdo).**
- **Waxaan ka noqon ama ka noqon karaa oggolaanshaha wakhti kasta qoraal ahaan, laakiin taasi ma saamayn doonto macluumaad kasta oo aan wadaagay.**
- **Waxaan fahamsanahay in diiwaannada loo wadaagey si waafaqsan oggolaanshahan in aanan la ilaalin iyada oo la raacayo shuruucda lagu dabaqayo DSHS.**
- **Nuqulka foomkan ayaa ansax ah oo bixinaya fasaxeyga wadaagista diiwaannada.**

SAXIIXA		TAARIIKHDA
MARKHAATI / SAXIIXA NOOTAAYAHA, HADDII LA ADEEGSAN KARO	MARKHAATI / MAGACA DAABACAN EE NOOTAAYAHA	TAARIIKHDA
SIXIIXA WAALIDKA AMA WAKIIL KALE (HADDII LA HELI KARO)	LAMBARKA TELEEFOONKA (KUDAR FURAHA XAAFADA)	TAARIIKHDA

Haddii aanan ahayn qofka ay khuseeyaan diiwaanadan, Aniga waxaa la ii oggolaadey in aan saxiixo sababtoo ah waxaan ahay: (soo lifaaq caddaynta jagada aad haysid)

☐ Waalidka ☐ Mas'uul Sharciyaysan (soo lifaaq amarka maxkamada) ☐ Wakiil shakhsiyeed
☐ Qofkale:

OGGEYSIISKA KU SOCDA DADKA QAADANAYA MACLUUMAADKA: **Haddii diiwaanadan ay ku jiraan xog ku saabsan fayruska HIV, Cudurada Galmada la isaga gudbiyo (STDs), Ama Aydhis (AIDS), waxaa laga yaabaa in aadan xogtaasi sii sheegin la'aanta oggolaanshaha gaarka ah ee macmiilka.** Haddii aad heshay macluumaad la xiriirta **ku xad gudub maandooriye ama aalkolo** oo uu isticmaalo macamiilka, waa in aad ku dartid bayaankan soo socda marka kashifaad macluumaad dheeraad ah looga baahdo dhinaca 42 CFR 2.32:

Macluumaadkan waxaa lagaaga soo siidaayey diiwaano ay ilaalinayaan Sharciyada qarsoodi ahaanta dowladda dhexe (42 CFR part 2). Sharciyada Federaalka waxay kaa mamnuucayaan in aad ku sameysid sii dayn kale oo dheeri ah macluumaadkan haddii sii dayn dheeri ah si cad loogu oggolaaday oggolaanshaha qoraalka ah ee qofka arrinta ay khuseysa ama haddii kale lagu oggolaaday sharciga 42 CFR qaybta 2. Oggolaansho guud oo loogu talogalay sii daynta macluumaadka caafimaadka ama macluumaad kale ma AHAN mid ku filan ujeeddadan. Sharciyada Federaalka waxay xaddidayaan isticmaal kasta ee ah macluumaadka si dambi ahaan loo baaro ama dambi loogu soo oogo bukaan ku xadgudbey daroogo ama khamriga.

Tilmaamaha Buuxinta Foomamka Oggolaanshaha, DSHS 14-012

Isticmaalka: Isticmaal foomkan marka aad u baahan tahay oggolaansho aad ku isticmaaleyso ama ku wadaageyso macluumaadka sirta ah ee ku saabsan macmiilka ee joogtada ah ku saabsan macmiilka gudaha DSHS ama si aad ugu sheegto macluumaadkaasi hay'ado kale si ay isugu duwaan adeegyo ama daaweyn, lacag-bixin ama hawlgallada hay'adda ama ujeeddooyin kale oo uu sharcigu aqoonsan yahay.

Foomkan elektaroonig ahaan u buuxi haddii ay suuragal tahay. Waa in aad u buuxisaa **foom gaar ah qof kasta, oo ay carruurta ka mid yihiin.**

Qaybaha uu Foomku ka koobanyahay:

AQOONSIGA:

- Magaca: Foom kasta ku qor oo keliya magaca hal macmiil. Ku dar magacyo kasta oo hore kuwaas oo macamiilka uu isticmaalay markii uu qaadanayay adeegaha.
- Taariikhda Dhallashada: Loogu baahanyahay in looga aqoonsado macamiilka dadka ay isku magaca yihiin.
- Lambarka Aqoonsiga: Sheeg lambarka aqoonsiga macamiilka ama waxyaabo kale oo lagu aqoonsan karo sida lambarka dammaanada bulshada (loo baahnayn) si loogu caawiyo aqoonsashada diiwaanada loona daba galo taariikhda iyo adeegaha la helay.
- Waxkale: Kuddar sanduuqan macluumaad kasta oo dheeri ah ee kaa caawin kara helidda diiwaannada, sida adeegyada ay DSHS ku lug leedahay, magacyada xubnaha qoyska, ama macluumaadka kale ee ku habboon.

OGGOLAANSHO (OGGOLAANSHAHA):

- Hay'adaha ama shakhsiyaadka diiwaannada isdhaafsanaya: Foomkan la buuxiyey wuxuu oggolaanayaa: (1) Isticmaalka iyo shaacinta macluumaadka sirta ah ee gudaha DSHS iyo hay'adaha ama shakhsiyaad liiska la taxay ku jira; iyo (2) u sheegidda macluumaadka sirta ah DSHS iyo hay'adaha bannaanka ama shakhsiyaadka liiska la taxay ku jira. Sidoo kale waxaad soo lifaaqi kartaa liis ay ku qoranyihiin wakaaladaha loo oggolaaday in ay dadka la wadaagaan macluumaadka kuwaas oo ay macamiilku natfiisu ay tahay in uu sixiixo.
- Macluumaadka lagu darayo: Macaamiisha waxaa khasab ah in ay sheegaan waxa ay yihiin diiwaanada lagu ceymiyay oggolaanshaha. Macaamiisha waxay ka dhigi karaan dhammaan diiwaanada in la helo ama waxay u xadayn karaan diiwaanada lagu daray taariikhda, nooca ama xogta diiwaanka. Haddii macamiilka uusan sixiixin oggolaanshaha ama xadidin diiwaan gaar ah, in la wadaago diiwaankaasi qoraalka ah weli waa la oggolaan doonaa haddii uu sharcigu midaasi oggolaado. Waxaad soo lifaaqi kartaa liis ay ku qoranyihiin diiwaanada la ceymiyay kuwaas oo ay macamiilku natfiisu tahay in uu sixiixo. Haddii wax diiwaano ah ay kamid yihiin macluumaadk xiriirka la leh caafimaadka maskaxda (RCW 71.05.620), natiijooyinka baaritaanka fayruska HIV/AIDS (Aydhiska) ama Cudurada Galmada La Isaga Gudbiyo ama daaweyn (RCW 70.02.220), ama adeegaha khamrada iyo aalkoolada (42 CFR 2.31(a)(5)), macamiilka waxaa khasab ku ah in uu u calaamadeeyo meelahaan si gaar ah si uu u bixiyo oggolaanshaha lagu wadaagayo diiwaanadan. Foomkan lama oggola in lagu darro qoraallada daaweynta nafsaani ee waafaqsan 45 CFR 164.508(b)(3)(ii) ; foom gaar ah waa in la buuxiyaa si loogu darro diiwaannadaasi.
- Muddada: Kuddar taariikhda uu oggolaanshuhu dhacayo, haddii uu ka duwan yahay kan halka sano. Oggolaanshaha wuxuu ku dhici doonnaa hal sano haddii aad tilmaanto taariikh ka duwan mooyaane.
- Fahmidda: Iska hubso in macamiilka uu fahmo waxa uu oggolaanshaha u siinayo iyo sida iyo sababta macluumaadka loo wadaagi doono. Haddii loo baahdo, isticmaal foomka turjuman iyo turjumaan ama ku akhri foomka cod dheer. Haddii macmilka uu macluumaad dheeraad ah u baahan yahay, bixi nuqulka dheeraadka ah ee Hab-dhaqannada Asturnaanta Ogeysiiska ee DSHS ama u gudbi macmiilka sarkaalka shaacinta dadweynaha ee qaybtaada

SIXIIXDA:

- Macmiilka: Hayso oggolaanshaha macamiilka ama ilmaha da'da weyn (13 ee loogu talogalay adeegaha khamrada iyo maandooriyaha iyo caafimaadka maskaxda; 14 ee loogu talogalay HIV/AIDS iyo kuwo kale oo ah Cudurada Galmada La isku Qaadsiiyo; da' kasta oo loogu talogalay xakamaynta dhalmada iyo ilmo iska soo ridida; 18 ee loogu talogalay daryeelka caafimaadka iyo diiwaano kale) sixiix khaanadan kadibna ku qor taariikhda sixiixa. Macamiilka wuxuu ku bedeli karaa calaamad la saaro khaanadan oo caddaynaya in aad tahay markhaatiga.
- Markhaati ama Nootaayo: Markhaati ama nootaayo ayaa loo baahan karaa si loo xaqiijiyo aqoonsiga macmiilka haddii macmiilka uusan qof ahaan u soo gudbin foomkan ama haddii barnaamijku uu xaqiijin codsado. Qofkan waa in uu saxiixo oo uu qoro magaciisa ama magaceeda.
- Waalid ama Wakiil Kale: Haddii uu macamiilku yahay ilmo kayar da'da oggolaansho bixinta, waalid ama qof mas'uul ah ayay khasab tahay in uu sixiixo. Haddii aanan ilmuhu kasoo bixin da'da oggolaansho bixinta ee loogu talogalay dhammaan diiwaanada dadka lala wadaagayo, dhammaan ilmaha iyo waalidka waa in ay sixiixaan. Haddii uu macamiilku sheegay in si sharci ahaan ah uusan awood u lahayn, qofka mas'uulka ah ee ay maxkamadu soo magacoowday ayay khasab tahay in uu sixiixo oona bixiyo nuqul ku saabsan amarka ay maxkamadu soo magacoowday. Haddii uu qof ku sixiixayo awood kale (ay kamid tahay qof haysta awood qareenimo ama wakiilka guriga), ku calaamadee “waxkale” kadibna hel nuqul ku saabsan maamulka sharciga ah ee hawsha qabanaya. Qofka sixiixaya waa in uu sheego taariikhda sixitaanka oona bixiyo lambarka teleefoonka ama macluumaadka xiriirka.